



Nagusoo biir nadiifinta biyaha!  
Wadajir waxaan samayn karnaa  
isbadel!  
Badbaadi. Sii gudbi.



### KUSAABSAN ANAGA

MWMo waa urur dadweyne oo wada shaqeynaya si loo ilaaliyo loona wanaajiyo biyaha iyo degaannada goobaha magaalada. Waxaan maalgalinaa dadka iyo kaabayaasha si ay u taageeraan biyaha nadiifka ah, oo bixiyaan aqoon, xog cilmiyeed iyo khibrad si ay gacan uga geystaan maaraynta khayraadkeena muhiimka ah ee biyaha.

### NASOO RAADI

#### Ururka Mississippi Watershed

2522 Marshall Street NE, Minneapolis, MN 55418-3329  
612-746-4970 / [mwm.org](http://mwm.org)

### NALA XIRIIR



# Ilaalinta Tayada Biyaha Si wadajir ah

Waxyaabaha fudud ee aad sameyn kartid si aad u ilaaliso tayada biyaheena iyo deegaanka.



### DEYR MAJIRO, DHIB MAJIRO

*Dhib malaha meesha ku nooshahay, qof walbaa wuxuu kaa caawin karaa ilaalinta tayada biyaha.*

**MA OGTAHAY?** Waan ka caawin karnaa inaan ka ilaalino wasakhda galaysa harooyinka maxaliga ah, dooxooyinka, iyo webiyada. Magaalada dhexdeeda, qof waliba waa in la wada shaqeeyaa si ay uga caawiyo joojinta wasakheeya yaashan waxyeelaynayo biyaha oo saameynaya nolosheena hadda iyo mustaqbalkaba.

Layaaban waxaad samayn karto si aad u ilaaliso biyaha? Ka dooro waxqabadyo bogogan si ay u joojiyaan galitaanka wasakhda tuubooyinka jidadkeena hoostiisa oo si toos ah utago meelaha biyaha.

### KA DHIG NADHIIF BIYA MAREENKA

Nadhiifi biya mareenka udhaw gurigaada markasta Kurid qashinka, caleemaha iyo cawska aad ka hesho halkaa si haboon. Xilliga jiilaalka, ka xaaq hambada milixda wadada ama ciida udhaw biya mareenka. Waad badbaadin kartaa oo aad dib u isticmaali kartaa ama aad kuridi kartaa.

### QAAD WASAQDA EYGA

Waan jecelnahay xayawaanadeena dab-jooqta, laakiin waaqdooda ayaa ku jira *E. coli* bakteeriyada iyo fosfooriga. wasakhdan waxay waxyeeleeyaan tayada biyaha, taas oo keenaysa jirro iyo dhibaatooyin kale ee dadka iyo nolaha biyo joogtada ah. qaad wasakhda xayawaankaaga dab-jooqta xaqiiji in bakteeriyadu aan lagu dhaqin biyo mareenka.

### ISTICMAAL MEELAHA GANACSIGA DHAQIDA BAABUURTA

Ganacsiga meelaha dhaqida baabuurta waxaa looga baahan yahay inay qabtaan saabuunta, biyaha wasakhaysan iyo kiimikooyinka loo isticmaalo in lagu nadiifiyo baabuurta. Tani waxay ka hortagtaa wasakhaynta biyaha ee dhici karta markaan ku dhaqno baabuurta wadada, meelaha gaari wadista ama deerkeena.

### BAABII WASAKHDA

Hoos u dhig wasakheynta biyaha adigoo kaliya iibsanaya waxyaabo aad u baahan tahay si loo yareeyo saamaynta xun ee biyaha ee mararka qaarkood dhaca inta lagu jiro wax soo saarka. Ka iibso alaabada laga sameeyay alaabta dib-u-warshadaynta. Kusoo biir magaaladaada dib-u-warshadaynta ama barnaamijyada qaabaynta.



### BIYA MAREEN IYO WASAKHAYNTA

Biya mareenku waxay si toos ah ugu xirmaan meelaha biyaha. Ka caawi inaan ilaalino tayada biyaheena adoo haynaya qashinka, caleemaha, cawska, milixda, ciida iyo kiimikooyinka oo ka baxsan biya mareenka.

*Sawir: Wakaaladda Xakamaynta Wasakhaynta ee Minnesota*

### TAAGEER MASHAARIICDA AMA SIYAASADAHA NADHIIFINTA BIYAHA

dhis fahamkaaga tayada biyaha. Weydii macluumaadka ururada maareynaya mashaariicda ama qorista siyaasadaaha saameyn kara meelaha biyaha. Kaqaybgal shirarka dadweynaha. Soo qor emailada ama waraaqo ama samee wicitaanada taleefan si aad wax uga wadaagto aragtiyadaada.

### KA QAYBGAL KOOXAHA ILAALIYA BIYAHA

Ku raaxeyso wakhtiga kuwa kale ee la wadaagaya danahaaga. Raadi fursado iskaa wax u qabso sida nadiifinta bulshada, dib-u-celinta deegaanka ama ilaalinta waskheeyaha. Raadi kooxo internetka ah iyo / ama hubi liistada bogga MWMO si aad u hesho kooxdu kugu haboon tahay: [mwmo.org/volunteer](http://mwmo.org/volunteer).